Victorian Equal Opportunity & Human Rights Commission

# Qaanuunka arrimaha khaaska ah

Xeerkani wuxuu sharxayaa sida Guddiga Fursadaha Sinaanta iyo Xuquuqda Aadanaha ee Victoria uu u maareeyo macluumaadka shakhsiyeed. Waxa kale uu qeexayaa waxaad samayn karto haddii aad su'aalo ama walaac aad qabtid.

## Sida aan u maamulno macluumaadkaaga shakhsiyeed

1. Waxaa naga go'an inaan ilaalino sirtaada oo aan u hogaansanno waajibaadkeena sharci ee ku saabsan sida aan u ururino, u maamulno aana u xafidno macluumaadkaaga shakhsiyeed. Haddii aan khalad samayno, waxaanu hagaajin doonaa sida ugu dhakhsaha badan ee aan awoodno.

## Qeexitaanno

2. Guddiga Fursadaha Sinaanta iyo Xuquuqda Aadanaha ee Victoria ayaa laga yaabaa, waxayna ku xiran tahay duruufaha, inay ururiyaan macluumaadka shakhsiyeed oo uu ku jiraan mid caafimaad ama macluumaad xasaasiga ah.
3. **Macluumaadka shakhsiyeed:** macluumaad kasta oo kalifi kara in la aqoonsado qofka sida magaca, faahfaahinta xiriirka, sawiro ama xogta bangiga.
4. **Macluumaadka caafimaadka:** macluumaadka ku saabsan qofka la aqoonsan karo kaas oo ku saabsan caafimaadkiisa jir ahaaneed, maskaxeed ama maskaxeed ama naafo ama sida ay rabaan in adeegyada caafimaadka loo bixiyo.
5. **Macluumaad xasaasi ah:** macluumaadka ku saabsan qofka qabiilkiisa ama isirkiisa, siyaasadiisa ama diintiisa caqiidadiisa ama xubinnimada, falsafada caqiidada, dookhyada galmada ama dhaqamada, diiwaanka dembiyada, ama xubinnimada ururka shaqaalaha.

Dabaqa 3aad, 204 Lygon Street, Carlton Vic 3053
Khadka weydiinta: 1300 292 153
humanrightsvic.gov.au

# Waa in aan u hogaansannaa sharciga baraayfasiga/sirta marka aan maamuleyno macluumaadka

6. *Xeerka Baraayfasiga/sirta iyo Ilaalinta Xogta 2014 (The Privacy and Data Protection Act 2014)* wuxuu nidaamiyaa ururinta iyo maaraynta dhammaan macluumaadka shakhsiyeed ee qaybta dadweynaha ee Victoria. Xeerka Diiwaanka Caafimaadka ee 2001 (The Health Records Act 2001) wuxuu dhigayaa in qaybaha dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay ay si mas'uuliyad ku jirto u maareeyaan macluumaadka caafimaadka. Waa inaan si taxadar leh u xafidnaa macluumaadka shakhsiyeed oo aan ka hortagnaa galitaanka, si xun u isticmaalka ama luminta aan la ogolayn. Sharciyadani waxay dhigayaan inaan ururinno ama isticmaalno oo keliya macluumaadka lagama maarmaanka u ah si aan u gudano shaqadeena oo uu sharciguna oggolyahay.

7. Mararka qaar, sharcigu waxa uu noo ogolaanayaa in aan isticmaalno ama bixino macluumaadka shakhsiyeed sabab kale dartood. Qaybta 176 ee Xeerka Fursadaha Loo Siman Yahay 2010 (Equal Opportunity Act 2010) wuxuu shaqaalaheenna ka hor istaagayaa inay ka diiwaan geliyaan ama ku shaaciyaan macluumaad kasta oo ay ururiyeen inta ay shaqada ku guda jireen ee ku saabsan shakhsiyaadka meel ka baxsan ururkan, marka laga reebo:

   – in waxqabadka shaqadeena, awoodahayaga iyo waajibaadkeena ay ka dhigayso kaydinta diiwaanka ama muujinta lama huraan

   – in maxkamadu ay nagu amartay inaan shaacino macluumaadka sababo la xiriira dacwad ciqaabeed mooyee

   – in shakhsigu uu noo fasaxo in aan sidaas sameyno.

# Xogta aan ururinno iyo sababta aan u ururinno

8. Guddiga Fursadaha Sinaanta iyo Xuquuqda Aadanaha ee Victoria (The Victorian Equal Opportunity and Human Rights Commission) waa hay'ad madax-bannaan oo qaanuuni ah oo bixisa khadka weydiinta telefoonka bilaashka ah iyo adeega xallinta khilaafaadka. Waxaan bixinaa adeegyo waxbarasho iyo latalin. Waxaan faragelinaa kiisaska sharciga ah ee ku lug leh Sharciga Fursadaha Loo Siman yahay 2010 iyo Xeerka. Waxaan samayn karnaa baaritaanno ku saabsan arrimaha nidaamka ee khuseeya takoorka. Waxaan la shaqaynaa macaamiisha iyo daneeyayaasha. Waxaan sidoo kale bixinaa adeegyada shirkadaha sida shaqaaleysiinta iyo inaan sii heyno shaqaalaha goobta shaqadeena. Tani waxay ka dhigan tahay inaan hayno macluumaadka ku saabsan weydiimaha iyo cabashooyinka, dadka ka qaybgalaya shirarka ama fadhiyada waxbarashada, dhinacyada ku lug leh dacwadaha, daneeyayaasha aan la shaqeyno iyo xubnaha shaqaalaha. Nooca

macluumaadka aan aruurineyno waxay ku xiran tahay adeegga aan bixineyno. Waxaanu ururin doonaa oo kaliya macluumaadka ku xiran shaqadeena. Akhri qoraalka ku saabsan xog ururinta shabakadayada

9. Waxaan siinaa macluumaad dadka raba inay wax ka ogaadaan takoorka, cayda, dhibanaha iyo dhibaateynta galmada. Waxaan inta badan ka uruurinaa macluumaadka shakhsiyeed dadka wax na soo weydiinaya. Tusaale ahaan, qof ayaa laga yaabaa inuu bixiyo macluumaadka caafimaadka haddii wax laga weydiiyo takoorka ku salaysan naafanimada.

10. Waxaan xallinaa khilaafaadka. Si aan taas uga caawino, waxa laga yaabaa in aanu ururino faahfaahinta xidhiidhka, faahfaahinta ku saabsan mulkiilaha loo shaqeeyo iyo dadka goobta kala shaqeeyo, xaalad caafimaad, waxqabadyada madadaalada, qoyska, iyo macluumaadka kale ee ku saabsan qofka xaaladihiisa gaarka ah si ay nooga caawiyaan xalinta cabashada. Waxaan mararka qaarkood weydiinaa macluumaad xasaasi ah si loo xalliyo khilaafaadka ku saabsan takoorka, cayda ama dhibanaha. Bixinta macluumaadka xasaasiga ah had iyo jeer waa mid ikhtiyaari ah.

11. Waxaan macluumaadka ka ururinnaa dadka ka qaybgalaya tababarka ama la-talinta bulshada. Tusaale ahaan, waxaanu ururinnaa magacyada, goobaha shaqada, nambarada telefoonada iyo ciwaanada iimaylka ee ka qaybgalayaasha. Waxa kale oo laga yaabaa inaan hayno macluumaadka ku saabsan cuntada uu qofku u baahan yahay iyo naafanimada, haddii aan u baahanahay inaan samayno isbedel macquul ah si aan u taageerno ka qaybgalka qofka ee kalfadhiga.

12. Waxaan ka soo aruurineynaa macluumaadka musharaxiinta mustaqbalka ee codsanaya shaqooyinka iyo sidoo kale shaqaalaha, tusaale ahaan, magacyada, ciwaanada iyo arrimaha caafimaadka. (Waxaa laga yaabaa, tusaale ahaan, inaan hayno macluumaadka ku saabsan naafanimada xubin shaqaale ah oo u baahan isbedel macquul ah in lagu sameeyo goobta shaqada.)

13. Marka aan aruurinayno macluumaadka, waxaan qaadi doonaa talaabooyin macquul ah si aan kaagala talino macluumaadka aan raadineyno iyo sababta aan u codsaneyno. Waan kuu sheegi doonaa haddii sharci kasta uu u baahan yahay ururinta macluumaadka iyo cawaaqibta, haddii ay jiraan, haddii aan la bixin. Inta badan, bixinta macluumaadka waxay noqon doontaa mid ikhtiyaari ah. Si kastaba ha ahaatee, tani waxay xadadi kartaa adeegga aan bixin karno.

14. Waxaan isticmaalnaa telefishin wareeg ah oo xiran (CCTV) si aan ula soconno oo aan u duubno dhaq-dhaqaaqa goobaheena dadweynaha oo ay ku jirto goobta soo dhoweynta, dariiqyada iyo wiishashka. Ma jiro CCTV ku xiran qolalka xisbiga ama wareysiyada, musqulaha ama qolalka tababarka. Waxaan u isticmaalnaa CCTV si aan u siino jawi badbaado leh oo ammaan ah booqdayaasha iyo shaqaalaha iyo si aan u ilaalino hantideena. Haddii aan u maleynayno in qof uu dembi ku galay dhismahayaga, waxa laga yaabaa in aan u baahanno in aan booliiska siino sawirro laga duubay CCTV si ay u baaraan.

# Sida aan u isticmaalno macluumaadkaaga

15. Waxaan u isticmaalnaa macluumaadka shakhsi ahaaneed ujeedooyinka loo bixiyay macluumaadkaas. Waxaan sidoo kale isticmaalnaa macluumaadka laga soo aruuriyay khilaafyada, baaritaannada iyo weydiimaha ujeedooyinka la xiriira. Tusaale ahaan, cilmi-baaris, waxbarasho ama ka soo warbixin guud oo ku saabsan hawlaheenna. Si kastaba ha ahaatee, shaaca ka qaadi mayno macluumaad si muujin karta qof ama urur, haddii aanu qofku ama ururku nagu raacin midaan.

16. Waxaa jira xaalado kooban oo aan ku sii deyn karno macluumaadka. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa inuu sharcigu nagu khasbayo inaan bixino macluumaadka haddii maxkamadi nagu amarto inaan sidaas samayno.

# Sida aan xogtaada u xafidno

17. Waxaanu u maamulnaa macluumaadkaaga si taxadar leh si aanu uga hortagno luminta, si xun u isticmaalka, gelida aan la ogolayn, wax ka beddelka ama siidaynta.

18. Waxaan meel u dhignaa isla markaasna u kaydinaa macluumaadka si waafaqsan *Xeerka Diiwaanka Dadweynaha ee 1973 (Public Records Act 1973)*.

19. Guddiga Fursadaha Sinaanta iyo Xuquuqda Aadanaha ee Victoria waa in ay u hoggaansamaan Heerarka Ammaanka Xogta Ilaalinta Victoria. Heerarkani waxay uga baahan yihiin ururada bulshada inay u hoggaansamaan shuruudaha si kor loogu qaado hab-dhaqannada amniga ee maaraynta macluumaadka shakhsiyeed. Waxaan leenahay qorshe qeexaya sida aan u shaqeyn doono si aan u xaqiijino in la buuxiyay Heerarkaas. Heerarka ayaa la xiriira:

    – sida aan u nidaamino una maamulno qaab-dhismeedka iyo habraacyada si aan u maareyno macluumaadka.

    – sida aan uga ilaalino macluumaadka helitaanka, isticmaalka, wax ka beddelka ama luminta aan la oggoleyn.

    – tallaabooyinka lagu qaado tignoolajiyada isgaarsiinta macluumaadka si kor loogu qaado amniga.

    – istaraatiijiyada lagu maareeyo khatarta shaqaalaha sida xun u isticmaalaya helitaankamacluumaadka ay gacanta ku hayaan waqtiga shaqada.

    – sida aan uga ilaalino shaqaalaheena, dhismayaasha, nidaamyada elektarooniga ah iyo faylalka galitaanka aan la ogolayn ee macluumaadka shakhsiyeed.

20. Tani waxay ka dhigan tahay in aan isticmaalno nidaam, jir-ahaaneed, software iyo ilaalinta qalabka, oo ay weheliyaan kontaroolada leh gelitaanka iyo nidaamyada kaydinta si loo ilaaliyo macluumaadka. Waxaan xadidnaa gelitaanka dhismayaashayada iyo

nidaamyadayada. Waxaan uga baahanahay dhammaan shaqaalahayaga inay si taxadar leh u maamulaan macluumaadka oo ay helaan kaliya waxay u baahan yihiin si ay shaqadooda u qabsadaan. Waxaan dejinay qorshayaal iyo habab loo habeeyey si aan u ilaalino macluumaadkaaga khaaska ah.

## Waxaad xaq u leedahay inaad hesho oo aad saxdo macluumaadkaaga

21. Haddii aad rabto inaad hesho macluumaadkaaga ama aad aaminsan tahay in macluumaadkaagu khaldan yahay oo aad rabto in la saxo, kaliya la xidhiidh xubinta shaqaalaha ee aad la macaamilaysay. Waxaad kala xidhiidhi kartaa sarkaalkayaga FOI foi@veohrc.vic.gov.au ama naga soo wac 1300 891 848.
22. Waxaan ku siin doonaa macluumaadka ama kaa caawin doona inaad sameyso codsi rasmi ah oo hoos yimaada Xeerka Xoriyadda Macluumaadka 1982.

## Waxaad si qarsoodi ah u geli kartaa qaar ka mid ah adeegyadayada

23. Waxaad ku geli kartaa qaar ka mid ah adeegyadayada si qarsoodi ah adiga oo ka raadinaya kana helaya macluumaadka websaytkayaga. Waxa kale oo aad dooran kartaa inaad ku bixiso macluumaadka qaab online ah.
24. Dadka nala soo xiriira qaarkood ayaa laga yaabaa inay rabaan in aan magacyadooda la sheegin. Ma ururino macluumaad qofka lagu aqoonsan karo xaaladahan oo kale. Xaaladaha qaarkood, si kastaba ha ahaatee, ma awoodi doono inaan caawino qofka annagoo aan ururin macluumaadka shakhsi ahaaneed. Tusaale ahaan, qofka cabanayaa wuxuu u baahan yahay inuu is sheego sidoo kalena sheego qofka ama hay'adda uu aaminsan yahay inay mas'uul ka tahay haddii ay rabaan inay helaan adeegyada xallinta khilaafaadka.

## Waxaan isticmaalnaa tilmaamo gaar ah

25. Waxaan u sameynaa nambar tixraaceed qof kasta oo raba inuu sameeyo cabasho ku saabsan takoorka. Nambarada tixraaca ayaa noo ogolaanaya inaan xafidno diiwaanka cabashooyinka laga sameeyay takoorka, dhibaatada galmada la xiriirta, cayda ama dhibanaha iyo inaan ka fogaano iska-horimaadyada danaha. Lama wadaagno nambarada tixraaca ururada kale.

## U wareejinta macluumaadka meel ka baxsan Victoria

26. Guud ahaan uma dirno macluumaadka shakhsiyeed meel ka baxsan Victoria, marka laga reebo, tusaale ahaan, macluumaadka shakhsiyeed ee ugu yar ee ku saabsan shaqaalaha ayadoo ujeedaduna tahay diyaarinta shirarka lala yeelanayo wakaaladaha kale. Xaalado aan caadi ahayn haday jiraan, waxa laga yaabaa inaan u dirno macluumaadka xubnaha dadweynaha meel ka baxsan Victoria haddii, tusaale ahaan, aanu gacanta ku hayno khilaaf u dhaxeeya laba qof oo qof ka mid ahi uusan ku sugneyn Victoria ama aanu ku lug leenahay dacwad Victoria ka baxsan. Dadka fadhigoodu yahay meel ka baxsan Victoria waxay shaqo ka dalban karaan Guddiga Fursadaha Loo Siman Yahay iyo Xuquuqul Insaanka ee Victoria. Waxaan aad uga taxadarnaa ilaalinta sirta isu gudbinta xogta xudduudaha.

## Sida aad waxyaabaha ku saabsan qaabka aan u maaraynay macluumaadkaaga khaaska ah noogaga caban karto

27. Haddii aadan ku faraxsanayn sida aan u maaraynay macluumaadkaaga shakhsiyeed, fadlan noo sheeg. Waxaan isku taxalujinaa inaan dhammaan cabashooyinka ku xallinno si degdeg ah oo caddaalad ah.

28. Xubin ka mid ah shaqaalaha Komishanku ayaa ka caban kara sida xogtooda ay u maareeyaan Guddiga Fursadaha Sinaanta iyo Xuquuqda Aadanaha ee Victoria. Waxaad la xiriiri kartaa Iskuduwaha Baraayfasiga si aad ugala hadasho waxaad ka welwelsan tahay. Waxaad sidoo kale kala hadli kartaa maamulahaaga. Way kula shaqayn doonaan si ay u xaliyaan.

29. Waxaad samayn kartaa cabasho ku saabsan sida aanu u maaraynay macluumaadkaaga khaaska ah adiga oo wacaya oo waydiisanaya inaad kala hadasho Iskuduwaha Arrimaha Khaaska ah 1300 891 848.

    Ama waxaad qoraal noogu soo diri kartaa:
    Xiriiriyaha Baraayfasiga
    Fursadaha loo siman yahay ee Victoria iyo Guddiga Xuquuqul Insaanka
    Level 3, 204 Lygon Street
    Carlton, Victoria, 3053
    Email: privacy@veohrc.vic.gov.au

# Haddii aadan ku faraxsanayn sida aan u maareyno cabashadaada sirta ah, waad caban kartaa

30. Haddii aadan ku faraxsanayn sidaan u maareyno cabashadaada sirta ah, waxaad la xiriiri kartaa Xafiiska Wakiilka Macluumaadka Victoria ama Guddoomiyaha Cabashooyinka Caafimaadka. Xubnaha shaqaalaha Fursadaha Loo Siman Yahay ee Victoria (Victorian Equal Opportunity) iyo Guddiga Xuquuqul Insaanka (Human Rights Commission) waxay kaloo usoo gudbin karaan cabasho.
    **Xafiiska Wakiilka Macluumaadka Victoria - Xifdinta sirta iyo Xogta**
    Telefoonka: 1300 006 842
    Imayl: enquiries@ovic.vic.gov.au
    Website: ovic.vic.gov.au
    Cinwaanka: PO Box 24274, Melbourne, VIC, 3001

31. Haddii cabashadaadu ay la xiriirto macluumaadka caafimaadka, waad caban kartaa.
    **Guddoomiyaha Cabashooyinka Caafimaadka**
    Telefoonka: 1300 582 113
    Website: hcc.vic.gov.au
    Cinwaanka: Level 26, 570 Bourke Street, Melbourne, VIC, 3000

*La cusbooneysiiyay Nofeembar 2019*